## SUURAT AL-HUMAZAH:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

***1. Halaag Wuxuu u Sugnaaday xanle wax ceebeeya oo dhan,***

***2. Oo Xoolaha kulmiya (xaqana ku bixinin).***

***3. Ma wuxuu u malayn in xoolihiisu waarin.***

***4. Saas ma aha ee waxaa lagu tuuri ( Naarta ) Xudhama***

***5. Ma taqaannaa Xudhama.***

***6. Waa Naarta Eebe ee la huriyay.***

***7. Gubaysana Quluubta (Kulayl dartiis).***

***8. Waana lagu dabooli Naartaas Gaalada.***

***9. Tiirar la fidiyay yayna ahaan dhexdeeda.***

***Qur'an 104: 1-9***

***Sharaxda Suurrada***

Xanta, Dadkoo la xaqiro oo la yaso, Xoolahoo la kulmiyo oon xaqa lagu bixinin waa arrimo xun ruuxii ku kacana sabab ugu noqota Naar galiddeed, saa daraaddeed waa in layska jiraa xumaanaha la soo sheegay, illeen xan wax kuuma qabto, Xoolana kuma waariyaan.